

ASC DHAKHTAR

WCS

DHAKHTAR anagu waan safraynaa oo familiga ayaan soo booqanaynaa, waxaana hubaa in gabadheena la gudi doono, halkee fiicin oo aad igula talin lahayd, ma dalkaan aan hadda joogno ayaan ku gudnaa mise dalkii hooyo

B: bismillaah Maxaa dhacay oo gabadha yar loo gudaaya?

dhakhtar adba waa ogtahay dhaqankeena, gabadhaydu hadda waa soo waynaatay

,Guddniinku waa caafimaad, waana wax asturaad ah ,diin ahaana waa nadaafad. Anago dhan waa nala soo guday .

ok ,waan ku fahmay laakiin ugu horayn macnaha guddniinka aan ku fahamsiiyo iyo dhibaataada uu gabdhaha u keenaayo. Gudniinku waa jarida xubinta taranka ee dumarka.waxaa jiro qaabab dhawr ah oo kala duwan. da'da iyo xiliga gudniinka gabdhaha lagu sameeyo wey kala duwanyahiin.

waxaad igu tiri gudniinku waa Asturaad iyo nadaafad, taasuna run ma aha. Gudniinka xubinta taranka ee dumarka waxey leedahay cawaaqiib halis ah ee caafimaadka gabdhaha iyo dumarka. Qaar ka mid ah way u dhintaan sabab la xiriirto natiijada jarida xubinta taranka. Dhibatooyinka suurtoogalka ah ee Gudniinka xubinta taranka ee dumarka waxaa ka mid ah:1-Cabsi, murugo, jahwareer iyo naxdin2- Infekshan 3-Xanuun xiliga caadada ama kaadida 4- Kaadi baxsad

5-Xilliga dhalnada oo ay dhibaato badan la kulanto ilmaha yarna saameynkara.6- Ma dhaleesnimo

7-.Xanuunka inta lagu jiro galmada iyo hoos u dhaca rabitaanka galmada

Haweenka iyo gabdhaha oo dhan ee la guday dhibaatooyinkaas ma wada qabaan. Hadii ay dhibaatooyin jiraan iyo nooca ey tahay,waxey ku xirantahay nooca gudniinka iyo sida gudniinka loo sameeyey.sidaas darteed gabadh iyo naag kasto qaab kale ayay ula kulantaa marxaladaha adag. Waxaa suurta gal ah xaalad nafsi iyo cudurada maskaxda in ay ku dhacaan.

A: Dakhtar , waan ku fahmay, anigaaba la ildaran calaamadahan xun oo ka yimaada gudniinka.

Dakhor sidee gabadhayda u caawinkara si aan loo gudin.

B:llaalinta gabadhaada ayaa ah adiga iyo ninkaaga masuuliyad idin saaran.

Ninkaagana u sheeg, fahamsii dhibaatooyinka gudniinka ,sasabto ah haddu asaga fahamsanyahay, gabadhiisa wuu badbaadin kara .fadlan u sharax ama workshop ka (GUDNIINKA) isla imaada si aa macluumaad buuxa uga heshiin . waan ogahay in wadamadaas guniinka gabdhaha lagu dhaqmo, inay yahiin dalal xagjir ah(conservative countries) Waa Bulsho aad u dhowrsan oo muxaafid ah oo leh caadooyin iyo dhaqan adag. Sidaas daraadeed markasta oo aad safartiiin waa ina gabadhiina ilaaliisiin. Xitta cunugtiina waa in aad u sheegtiin in ay isilaaliso, mathalan haday dareento Ayeeyo iyo Eedo in ay sasabayaan, erayo qurux badan maanta gabadh sharaf badan laga dhigaya,maanta xaflad lagu samayn ,haday maqasho in ay ka cararto oo idiin sheegta isla markiiba .fadlan marwalba qaraabadiina u sheega in iidna rabin in gabadhiina la gudo,noocay ahaato suno iyo firconii ba oo aad

ka soo hurjeedan gudniinka. Si kastaba ha noqotee , waa inaad ogaataa inaad sharci ka jiro dalka Austria in uu diiday Gudniinka cayn kasta uu yahay . Gudniinku waa Xadgudub xuquuqda aadanaha. xuquuqda carruurta iyo xadgudub xuquuqda haweenka. Qofkii Gabadhiisa guda sharciga dalka Austria wuu ciqaabaya , xabsi muddadiisu 5 ila 10 sano tahay Iyo ganaax gaaraaya 10.000 Euro ayuu mudan doonaa.

A: dhakhtar sidee ninkayku idiinla soo xiir kara , haduu fahmi waayo, ama mucluumad badan oo Gudniinka ku saasab u baahdo?

B: Ninkaagu wuu nala so hadli karaa, , hadduusan luuqada Germanka si fiican u fahmayn , qof afoomali ku hadla ayaa loo diyaarinayaa.

Lambarkaan ayuu nagala soo xiriiri kara:01601915201

Cinwaanku waa : Frauengesundheitszentrum; FEM süd

Halkaanu waa xarunta caafimaaka, oo luuqada badan sida af-jarmal , af faransiiska af carabiga, af soomaliga af Ingriisk ayaan ku bixina talooyinka caafimaadka waxaana siinaa talooyinkaas gabdhaha,dumarka,ragga, iyo qoysaska.

A: waad mahadsantahy,

B: adaa mudan,